

**Waaxda Waxbarashada
Natiijooyinka Barashada Ardayga***La Ansixiyey Janaayo 27, 2011*

Carruurta ka qalinjibisa Waxbarashada Carruurnimada Hore ee Highline Community College waxay awood u yeelan doonaan in ay:

- Maamulaan fasalada oo ku dhaqamaan edaabta barashada iyagoo fulinaya tabaha lagu dhisayo kartida wax bartayaasha bulshada, isticmaalaan khayraadka dheeraad ah iyo hay'adaha banaanka marka ay ku habboon tahay.
- Muujiyaan aqoontooda dhaqanka iyago ku muujinaya is-wacyigelinta, ficilada sinaanta bulshada, iyo aqoonta ardayda ee shakhsiyaad iyo kooxoodba iyo dhaqamada iyo sameeynta hababka waxbarasho ee ugu wanaagsan.
- Isticmaalaan aqoonta koritaanka carruurta si ay ugu sameeyaan iyo fuliyaan manhaj dhaqangal ah oo ka jawaabaya baahida kala duwan ee wax bartayasha si shaqsiyan iyo kooxoodba. Waxay ku soo daraan aqoonta jawiyo ah kuwo caafimaad qaba, ixtiraam leh, taageero iyo imtixaano siiya dhammaan ardayda waxbarata.
- U dhaqmaan sida waafaqsan siyaasadaha maamulka hadda, heerka xirfadeed iyo sharuucda anshaxa ee xirfadda waxbarashada fulinayana falsafada iyo go'aamada suuragalka iyagoo isticmaalaya geedi socodka meerto leh aragti, ficil iyo digtoonaa.
- La socdaan, qoraan oo qiimeeynaan waxbarashada si ay uga taageeraan guusha iyo horumarka ardayda kala duwan, waxay isticmaalaan macluumaad si ay ugu muujiyaan waxtarka waxbarashadooda gaarka ah.
- Og yihiin, fahansan yihiin oo qiimeeyaan kala duwanaanta dhismayaasha qoyska iyo dhaqamada, kuwaas oo ay u isticmaalaan in ay ku dhisaan iyo ku joogteyaan qoyska iyo bulshada iskaashi laba geesood ah oo dhab ah si ay sida ugu fiican ugu taageeraan waxbarashada ardayga.

Hadafyada Eex Diiditaanka

Hadafka 1: Ilmo kasta waxa uu muujin doonaa iska warhayn, kalsooni, ku faraxsanaanta qoyska, iyo aqoonsiga wanaagsan ee bulsho.

Hadafka 2: Ilmo kasta wuxuu muujin doonaa qalbi deggan oo leh farxada kala duwanaanta aadanaha; luqad sax ah in uu u yeesho kala duwanida aadanaha; oo qoto dheer, iyo daryeelka xiriirka aadanaha.

Hadafka 3: Ilmo kasta waxaa sii kordhi doonaa aqoonsashadiisa xaqdarada, waxana uu baran doonaa luqad uu ku qeexo xaqdarada, iyo garan doonaa in xaqdaradu tahay wax xun.

Hadafka 4: Ilmo kasta waxuu muujin doonaa awood u lahaanshada iyo xirfadaha habka loola dhaqmo, dadka kale ama keligii, ee ka soo horjeesashada nacaybka iyo/ama falalka takoorka.

